| | | | |
|---|---|---|---|
| Asal ahaan | 05/2003 | Milkiilaha | Teresa Rainey: Agaasimaha Sinnaanta iyo Ku darista |
| Markii ugu dambeysay ee la Ansixiyay | 06/2025 | | |
| Dhaqangaleyso | 06/2025 | Aagga | Maamulka Guud - 0001-0100 |
| Dib u eegista ugu Dambeysay | 06/2025 | | |
| Dib u eegista Xigta | 06/2028 | | |

# Xeerka Helitaanka Luuqada - PO-0802

## 1. Ujeedka

Ujeedada xeerkaan ayaa ah hubinta in hay'adda ay siiso macaamiisha leh Aqoonta luuqada Xadidan (LEP) iyo helitaanka waxtarka leh ee barnaamijyada hay'ada, adeegyada, iyo faa'idooyinka. Waaxda Shaqada Oregon (Oregon Employment Department) waa hay'ad fursad simman oo kuma takoorto shaqada ama bixinta adeegyada dad weynaha iyadoo lagu saleynayo jinsiyad, midab, diin, sinji (oo ay ku jiraan uurka, dhalmada, ama xaaladaha caafimaadka la xiriira, aqoonsiga jinsiga, iyo heerka labeebka), dooqa galmada, asalka dhalashada (oo ay ku jiraan aqoonta Ingiriiska xadidan), da'da, naafonimada, xiriirka siyaasadeed ama caqiidada, muwaadinnimada ama xaalada guurka, ama ka qeybqaadashada Xeer walbo Hal abuurka Shaqada iyo Fursada Title I– barnaamijka maaliyad ahaan loo caawiyo ama howsha.

Hay'adda waxay hubineysaa in xeerkaan uu gaaro ujeedo ganacsi oo sharci ah; wuxuu u hogaansamaa Tilmaamaha Tallaabada Waxqabadka iyo sharciyada faderaalka iyo gobolka; oo waxay ka tarjuntaa howlgalka, himilada, qiyamka, yoolalka xeeladeysan ee hay'ada iyo ka go'naanta sinnaanta iyo ka mid noqoshada.

## 2. Quseynta

Xeerkaan wuxuu quseeyaa dhammaan adeegyada hay'ada iyo goobaha shaqada.

## 3. Qeexitaanada

A. Bayaanka Helitaanka (oo sidoo kale loo yaqaan ogeysiinta Babel): Ogeysiin gaaban oo lagu daray dukumenti ama dhexdhexaadka elektarooniga (*tusaale ahaan,* warqad, websayd, "abka," i-meelka) oo luuqado badan oo ogeysiinayo aqriyaha in isgaarsiinta ay wadan karto warbixin muhiim ah, oo sharaxeyso sida loo helo adeegyada luuqada ee

loo helo tusmooyinka isgaarsiinta ee lagu bixiyo luuqadaha kale. **Bayaanka Helitaanka OED waa in lagu turjumaa luuqadaha muhiimka ah iyo luuqadaha dheeraadka ah ee OED.**

B. Luuqada muhiimka ah: Luuqada ay ku hadlaan tiro badan ama qeyb ka mid ah dadweynaha u qalma in loo adeego, ama ay u badan tahay inay la kulmaan OED.

C. Warbixin muhiim ah: Sida lagu qeexay 29 CFR 38.4(ttt), warbixinta, ha ahaato mid qoran, hadal ama elektaroonig ah, taasi waxay muhiim u tahay qofka si uu u fahmo sida loo helo gargaar walba, faa'ido, adeeg, iyo/ama tababar; ama looga baahanyahay sharci ahaan. Tusaalooyinka dukumentiyada wato warbixinta muhiimka ah waxaa ka mid ah, laakiin kuma xadidno:

1. Arjiyada
2. Foomamka ogolaanshaha iyo cabashada
3. Ogeysiinada xaquuqaha iyo masuuliyadaha
4. Ogeysiinada kula taliyo shaqsiyaadka Aqoonto Ingiriiska Xadidan xaquuqahooda, oo ay ku jiraan helitaanka caawinta luuqada oo bilaash ah
5. Buuggaagta sharciga
6. Imtixaamada qoran ee aanan qiimeynin aqoonta luuqada Ingiriiska, laakiin badelkeeda qiimeeyo aqoonta shatiga gaarka ah, shaqada, ama xirfada oo aqoonta Ingiriiska aanan loo baahneyn
7. Waraaqaha ama ogeysiinada uga baahan jawaab ka faa'ideystaha aa codsadaha, ka qeybqaate, ama shaqaale.

D. Luuqad dheeraad ah: Luuqad aanan daboolin heerka luuqada muhiimka ah, laakiin ay tahay heerka xiggo ee mudnaanta ee si firfircoon u turjumeysa warbixinta muhiimka ah.

E. Ogeysiinta Babel: Wixii ujeedooyinka luuqada cad, OED waxay tan u tixraacdaa sida Bayaanka Helitaanka.

F. Aqoonta/Kartida Ingiriiska Xadidan (LEP): Dadka aanan ugu hadlin af Ingiriis sida luuqada koowaad oo leh awood xadidan ee lagu aqriyo, loogu hadlo, lagu qoro, iyo/ama lagu fahmo Ingiriiska waxaa lagu qeexi karaa sida Aqoonta Ingiriiska Xadidan (LEP). Shaqsiyaadka LEP waxaa laga yaabaa inay aqoon u leeyihiin Ingiriiska noocyada qaar ee isgaarsiinta (tusaale, ku hadalka ama fahamka), laakiin weli u LEP ujeedooyin kale (tusaale, aqrinta ama qoraalka).

G. Shaqaalaha labada luuqad ee u qalma: Shaqaalaha ay qiimeeyeen dhinac sadexaad oo madax banaan sida ay u suurtogashay inay sameeyaan ganacsiga hay'ada ee Ingiriiska iyo luuqad dheeraad ah oo siiso helitaan waxtar leh ee macaamiisha Aqoonta Ingiriiska Xadidan. Hay'ada ayaa xulato dhinaca sadexaad ee madaxa banaan oo bixiso lacagta qiimeynada.

# 4. Xeerka

Markii OED ay ogaato luuqada la doorbido ee macmiilka Aqoonta Ingiriiska Xadidan ee gargaarka, faa'idada, adeega, ama tababarka, OED **waa inay** gudbisaa warbixinta muhiimka ah ee luuqadaas.

A. Haddii luuqada la doorbido ay tahay luuqad muhiim ah, OED **waa inay** ku turjumaan warbixinta muhiimka ah qoraalo qoran ee luuqada muhiimka ah oo ay ugu diyaarisaa fasiraada macmiilka koobi warqad ah  ama elektaroonig ahaan.

   1. OED ayaa go'aamiso luuqadaha muhiimka ah iyadoo la isticmaalayo heerarka xiggo:

      a. Haddii luuqada ay ku hadlaan ama qoraan ugu yaraan 25,000 oo qof waxay u badantahay inay la kulmaan ama u qalmaan in loogu adeego, sida ku saleysan shaqaalaha shaqada Oregon, AMA

      b. Haddii luuqada ay ku hadlaan ama qoraan ugu yaraan 2% oo qof waxay u badantahay inay la kulmaan ama u qalmaan in loogu adeego, sida ku saleysan shaqaalaha shaqada Oregon.

   2. Sida ku saleysan heerarka kore, luuqada muhiimka ah ee OED waa Isbaanish. OED **waa inay** ku turjumaan warbixinta muhiimka ah qoraalo qoran oo af Isbaanish ah oo loogu diyaariyo turjumaada macmiilka koobi warqad ah ama elektaroonig ahaan.

B. Dhammaan luuqadaha kale ee aan muhiimka aheyn, OED waa inay weli qaadaa tallaabooyin macquul ah ee lagu go'aamiyo oo lagu daboolo baahiyaha luuqada gaarka ah ee macmiil walboo Aqoonta Luuqada Xadidan ee raadinayo inuu wax ka barto, ka qeybqaato, iyo/ama helo gargaarka, faa'idada, adeega, ama tababarka ay bixiyaan OED. Tusaale ahaan, haddii turjumida warbixinta aysan macquul aheyn ama aysan dabooleynin baahiyaha macmiilka gaarka ah, OED waxay ku soo sheegi kartaa warbixinta muhiimka ah dhinaca midkood shaqaalaha labada luuqad ee u qalma ama turjubaanada qandaraaska lala galay. Habraaca wuxuu wataa tusaalooyin dheeraad ah.

C. Sida ka qeyb ah ka go'naanta OED ee adeega macmiilka, OED waxay sidoo kale sameyneysaa dadaalada si firfircoon loogu fasiro warbixinta muhiimka ah luuqado dheeraad ah, sida ay ku hageen Qaabdhismeedka Sinnaanta OED. OED ayaa go'aamiso luuqado dheeraad ah iyadoo la falanqeynayo codsiyadaha luuqada macmiilka, doorbiditaanada luuqada ee shaqaalaha shaqada Oregon ee si yar ee aan fiicneyn ugu hadla af Ingiriis, iyo xogta kale ee quseyso.

   1. Luuqadaha dheeraadka ah ee OED waa Shiineeska Fudud (qoraal ah), Shiineeska Caadiga ah (qoraal ah), Kantonees (hadal ah), Maandheriin (hadal ah), Fiitnaamees, Raashiyaan, Kuuriyaan, Carabi, Soomaali, Laoo, Amxaaro, iyo Farsi.

## 5. Jadwalka Dib u eegida

Xeerkaan waxaa dib loo eegayaa labo sanno ee walba ama in ka badan sida loogu baahdo.

## 6. Marka laga reebo

Ma jiraan wax ka dhaafid ah ee xeerkaan.

## 7. U hogaansanaanta

Haddii lagu guuldareysto u hogaansanaanta habaracaan waxay keeni kartaa tallaabo edbin ah oo illaa iyo ay ku jiraan ka ceyrinta bixinta adeegga gobolka. Fadlan la tasho maareeyaha, waax ama ku xigeenka agaasimaha, ama illaha aadanaha haddii aadan hubin wax ku saabsan u hogaansanaanta.

## 8. Tixraacyada

A. Qodobka 188 ee Xeerka Hal abuurka iyo Fursadaha Shaqaalaha https://www.dol.gov/agencies/oasam/ centers-offices/civil-rights-center/statutes/section-188-workforce-innovation-opportunity-act

B. 29 CFR 38 – Hirgelinta Bixinada Takoor la'aanta iyo Fursadaha Simman ee Xeerka Hal abuurka iyo Fursadaha Shaqaalaha https://www.ecfr.gov/current/title-29/subtitle-A/part-38

C. Title VI, Xeerka Xaquuqaha Rayidka ee 1964 https://www.dol.gov/agencies/oasam/regulatory/statutes/title-vi-civil-rights-act-of-1964#%3A~%3Atext%3DNo%20person%20in%20the%20United%2Cactivity%20receiving%20Federal%20financial%20assistance

## Su'aalaha iyo Cabashooyinka

- Sarkaalka Cabashooyinka/Fursadaha Simman: Eric Villegas, 503-947-1794, ama eric.l.villegas@employ.oregon.gov
- Foomka cabashada: https://www.oregon.gov/employ/Pages/Equal-Opportunity.aspx